# Hara Ngākau Kino | Dib u eegidda dambiga nacaybka

## SHURUUDAHA TIXRAACA

## GUUDMARKA MASHRUUCA

Te Aka Matua o te Ture | Guddida Sharciga ayaa dib u eegi doonta sharciga Aotearoa New Zealand ee la xiriira dambiga nacaybka, iyagoo diiradda saaraya haddii sharciga ay tahay in la beddelo si loo abuuro shuruuc cusub oo loogu talogalay dambiyada nacaybku keenayo. Ujeedada dib u eegistan darteed, "dambi nacayb" waxa loola jeedaa habdhaqanka markii horeba ahaa faldambiyeed sida uu dhigayo sharciga New Zealand oo, sidoo kale, loo fuliyo nacaybka ama cadaawadda loo qabo koox dad ah darteed kuwaasoo wadaaga sifooyin isku mid ah (sida qoomiyad, midab, waddan, diin, jinsi, aqoonsi jinsi, doorasho jinsi, da' ama naafonimo).

Wakhtigan, sharciga Aotearoa New Zealand wuxuu kaga jawaabaa dambiyada nacaybka xukun. Haddii qof uu dambi galo sababtoo ah nacayb uu u qabo koox dad ah oo wadaaga "sifooyin guud oo waaraya", maxkamaddu waxa waajib ah inay arrintan u arkaan arrin xaalka sii xumaanaysa marka xukumidda (fiir qaybta 9(1)(h) ee Xeerka Xukumidda 2002).

Warbixinta Guddida Sare ee Waydiimaha ee weerarkii argagixiso ee Christchurch masjidain ee 15 Maarso 2019 wuxuu ku taliyey abuurista shuruuc cusub oo ka dhan ah dambiyada nacaybku riixayo. Si gaar ah, talada 39 waxay soo jeedisay in shuruuc cusub oo ka dhan ah dambiyada nacaybku riixayo la dejiyo.

(a) Xeerka Guudmarka Dambiyada 1981 (u dhigma dambiyada jira ee habdhaqanka ama luuqadda dambiga ah, weerarka, damcidda waxyeelayn iyo cabsigalinta); iyo

(b) Xeerka Dambiyada 1961 (u dhigma dambiyada jira ee weerarka, gudbitaanka iyo waxyeelaynta ulakaca ah).

## BAAXADDA DIB U EEGISTA

Dib u eegista Sharciga Guddida waxa ku jiri doona, laakiin aan ku koobnayn:

(a) Haddii sharciga wakhtigan ee Aotearoa New Zealand uu si ku filan uga jawaabayo dambiga nacaybka (si gaar ah qaybta 9(1)(h) ee Xeerka Xukumidda 2002, taasi oo shardi ka dhigaysa dhiirigalinta cadaawaddu la socoto in xisaabta lagu darsado marka dambiile la xukumayo).

(b) Haddii wax walaacyo ah oo ku saabsan hawlgalka sharciga wakhtigan ay tahay in wax looga qabto tallaabooyin sharci-dejineed (ama hawlgaleed), tusaale ahaan, dejinta shuruuc dambiyada nacaybku riixayo lagula dagaalamayo.

(c) Haddii shuruuc dambiyada nacaybku riixayo lagula dagaalamayo ay tahay in la dejiyo:

(i) waa kuwee dambiyada hadda jira ee lagu qaabilayaa;

(ii) waa kuwee sifooyinka guud ee ay tahay inay yeeshaan;

(iii) sidee qaybta nacaybka ama cadaawadda dambiga ay tahay in loo dejiyo:

(iv) waa maxay ciqaabaha ugu daran ee ku habboon; iyo

(v) haddii ay wanaagsan tahay in wax ka beddel lagu sameeyo Xeerka Xukumidda ee dambiyada cusub iyo hubinta in dambiilayaasha dambiga nacaybka si ku habboon loo xukumo.

Markay talo ka bixinayaan dib u habaynta, Guddida Sharcigu waxay xisaabta ku darsan te ao Māori waxayna tixgalin siin in bulsho dhaqano kala duwan leh ku nool yihiin New Zealand.

Dib u eegistu tixgalin siin mayso dambi ka dhigidda habdhaqanka aan hadda ahayn dambi sida sharciga New Zealand dhigayo. Si shaki looga fogaado, dib u eegistu tixgelin mayso talobixinaha 40 iyo 41 ee Warbixinta Guddida Sare ee Waydiimaha ee weerarkii argagaxisada ee Christchurch masjidain ee 15 Maarso 2019, oo uu khuseeyo:

(a) sharciga la xiriira hadalka nacaybka, oo ay ku jiraan qaybaha 61 iyo 131 ee Xeerka Xuquuqda Aadanaha 1993; iyo

(b) qeexitaanka goorta daabacaaddu ay tahay mid "la diidi karo" qaybta 3 ee Xeerka Qaybinta Filimada, Fiidyowyada, iyo Daabacaadaha 1993.

## JADWALKA IYO HANNAANKA

Guddida Sharciga waxa u qorshaysan inay dadwaynaha kulan la qaadato horraanta 2025.

Guddida Sharcigu waxay ku talo jirtaa inay uga warbixiso Wasiirka ku shaqada leh Guddida Sharciga talobixinaheeda ugu dambayn bartamaha 2026.

## KU SAABSAN GUDDIDA SHARCIGA

Guddida Sharcigu waa hay'ad madaxbannaan oo Dadwayne taasoo Dawladda kala talisa dhanka sharciga. Dawladdu shuqul kuma laha sida aanu u fulino shaqadeena ama talobixinaha aanu soo jeedino.

Waxaanu fulinaa cilmi-baaris iyo ka qaybgalin, waxaanan kadib talobixino siinaa Dawadda si sharciga loo sii horumaryo. Talobixinadan waxa lagu daabacaa

warbixin ku socota Wasaaradda Caddaaladda. Wasiirka waxa waajib ku ah inuu hor keeno warbixintayada Baarlamaanka.

Dawladdu waxay go'aansan haddii iyo sida sharciga loo beddeli doono. Waxaad ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan waxaanu qabano websaytka Guddida Sharciga.